

Somaliska - Råd och information om lugnande medicin vid tandläkarbehandling

Talooyin iyo macluumaad ku saabsan daawada dejinta ee daaweynta ilkaha

Baaritaanka ka hor

Waa muhiim in aan ogaanno cudurradaada iyo daawooyinkaaga suurtoagal ah. Si awood looga yeesho qiyaas daawo oo sax ah waxaan xitaa u baahannahay in aan ogaanno miisaankaaga inta uu yahay.

Tani ayaa u baahantahay in aad ogaatid

Sidaan ayay u shaqeysaa Midazolam

- Waad degeysaa, waxaana dareemeysaa welwel yari waqtiga daaweynta.
- Daawada ma aha mid xanuunka joojisa waxaana sidaas daraadeed qaadan kartaa kabaabiyo sida caadiga ah haddii aad dooneysid.
- Xasuusnaanta daawaynta kadib inta badan ma aha mid saas u cad maadaama daawada ay si kumeel gaar ah ay u saameyso awoodda in wax la xasuusta ah.

Sidaan ayaa loo bixiyaa Midazolam

- Daawada waxaa lagu qaataa rugta caafimaadka 20-30 daqiiqo ka hor daawaynta.
- Inta badan iyadoo hab milan ah si loo cabo.
- Ilmaha mararka qaarkood waxaa laga siiyaa dabada iyadoo loo marinaaya tuubo balaastiik ah.

Ay tahay in laga fikiro daaweynta ka hor

Waa muhiim in aadan wax cunin ama aadan cabin labo saacadood ka hor booqashada. Xasuusnaw in aad booqashada ku timaadid waqti hore.

Ay tahay in laga fikiro daaweynta kadib

Midazolam waxay kusii jiraysaa jirka maalinta oo dhan. Daawaynta kadib waa in aad joogtid rugta caafimaadka saacad ilaa labo saacadood. Maadaama ay daawadu saamayn nasasho ah ku keeneysa muruqyada, ayna saamayn ku reebeysa dheelitirnaanta, waa muhiin inaadan ka qaybqaadanin dhaqdhaqaaqyo jireed ama aad u baxdo taraafikada isla maalintaas. Baabuur wadista lama oggola ilaa labo iyo toban saacadood kadib. Waxaa u baahantahay inuu ku wehliyo qof ku hago daawaynta kadib, xitaa marka dambe ee aad aadeysid guriga kana baxaysid rugta caafimaadka.

Macluumaad ku socda mas'uuliyiinta ilmaha

Ay tahay in laga fikiro inta lagu gudo jiro daaweynta

Mararka qaarkood waxaa dhacda in ilmuhu inkastoo la daaweeyay xanaaqo ama murugoodo, markaa waxaad ku caawin kartaa adigoo taageeraya oona dejinaaya. Waa muhiim in markaa dabadeed aad sawir fiican ka bixisid sida ay wax u dhaceen, maadaama ay tani noqon doonto waxa ilmuhu xasuusan doono

Ay tahay in laga fikiro daaweynta kadib

Marka baabuur lagu aadayo guriga waa in ilmuhu sida caadiga ah ku fadhiyaa kursiga ilmaha oo suunka amniga leh uuna ag joogo qof wayn. Kula joog ilmaha guriga si degan maalintaa inta ka harsan, ishana ku hay ilmaha, maadaama ay dheelitirnaantu saameyn ku yimid. Haddii ilmuhu gam'o waa inuu dhinac u seexo.

Waa immisaa qiimaha isku daaweynta Midazolam?

Daaweyntaan waxay u baahantahay waqti dheeraad ah oo rugta caafimaadka ah. Wuxuu kharash la'aan u yahay ilmaha iyo da'yarta qaanqaarka ah ee ku jira daryeelka ilkaha ee caruurta-iyo dhalinyarada ee bilaashka ah. Dadka waa weyn waxaa lagu dallacayaa si waafaqsan liiska qiimaha ee jiro. Haddii goor dambe la cudurdaarto ama la imaanin waxaa lagu dallacayaa caruurta iyo dadka waa weyn labadaba khidmad sare.

Svenska - Råd och information om lugnande medicin vid tandläkarbehandling

Råd och information om lugnande medicin vid tandläkarbehandling

Inför behandling

Det är viktigt att vi känner till dina eventuella sjukdomar och mediciner. För att kunna dosera rätt behöver vi även veta vad du väger.

Det här behöver du känna till

Så fungerar Midazolam

- Du slappnar av och känner mindre oro under behandlingen.
- Läkemedlet är inte smärtstillande och därför kan du få bedövning som vanligt om du vill.
- Minnet av behandlingen är vanligtvis inte så tydlig efteråt eftersom medicinen tillfälligt påverkar förmågan att komma ihåg.

Så ges Midazolam

- Läkemedlet tas på kliniken 20–30 minuter före behandlingen.
- Vanligtvis i form av en lösning att dricka.
- Till barn ibland via en plastpip i ändtarmen.

Att tänka på före behandling

Det är viktigt att du inte äter eller dricker två timmar innan besöket. Tänk på att komma i god tid till besöket.

Att tänka på efter behandling

Midazolam finns kvar i kroppen under hela dagen. Efter behandlingen får du stanna kvar på kliniken i en till två timmar. Eftersom medlet verkar avslappnande på musku-laturen och påverkar balansen är det viktigt att inte delta i fysiska aktiviteter eller att ge sig ut i trafiken samma dag. Bilkörning är inte tillåten förrän efter tolv timmar. Du ska ha sällskap av en ledsagare direkt efter behandlingen och även senare på väg hem från kliniken.

Information till vårdnadshavare

Att tänka på under behandlingen

Ibland händer det att barnet trots medicinering blir argt eller ledset och då kan du hjälpa till genom att stötta och lugna. Det är viktigt att du efteråt ger en positiv bild av händelseförloppet då detta blir vad barnet kommer ihåg.

Att tänka på efter behandling

Vid hemresa i bil ska barnet sitta som vanligt i bilstol med säkerhetsbälte samt ha en vuxen bredvid sig. Ta det lugnt hemma med barnet resten av dagen och håll barnet under uppsikt eftersom balansen är påverkad. Om barnet somnar ska det ligga på sidan.

Vad kostar behandlingen med Midazolam?

Denna behandling kräver extra tid på kliniken. Den är kostnadsfri för barn och unga vuxna inom ramen för den fria barn- och ungdomstandvården. Vuxna debiteras enligt gällande prislista. Vid sena återbud och uteblivande debiteras en högre avgift för såväl barn som vuxna.